

## Oggaysiis ku saabsan Muraajacada U qalmida Da'da Labaatan (20) Notification of Age Twenty (20) Eligibility Review

MAGACA IYO CINWAANKA MACAMIILKA

MAGACA IYO CINWAANKA WAKIILKA MACMIILKA

### JAWAAB CELIN: OGGAYSIIS KU SAABSAN MURAAJACADA U QALMIDA DA'DA LABAATAN (20)

Adiga hadda waxaad u qalantaa Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA). U qalmidaada aad u qalantid Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA) waa in muraajaco lagu sameeyo kahor inta aadan gaarin dhallashada da'daada labaatanaad (20<sup>aad</sup>). Macluumaadka aynu hayno waxaa dhici karta in uusan kugu filnayn si aad usii wadid u qalmidaada aad ugu qalantid Maamulka Naafooyinka Koriinka hoosta mid kamid ah shuruudahaan soo socda: Naafo Garashada ah, Cudurka Dabaysha, Cudurka Qalalka, Cudurka Maskaxda ku dhaca ee Aatisim, ama Cudur Kale oo Dareemayaasha ah **ama** Xaalad Kale oo Lamid ah Naafo Garashada ah. Waxaan soo lifaaqay Jadwalka Dukumeentiga Loo baahanyahay si aad u ogaatid macluumaadka loo baahanyahay.

#### Maxaad u baahantahay in aad samaysid?

Maamulka Naafooyinka Koriinka waxaa farxad u ah in ay soo dirto macluumaadka loogu baahdo dib-u xadididaan. Haddii aad doonaysid in Maamulka Naafooyinka Koriinka uu soo diro macluumaad, fadlan u buuxi foomka oggolaanshaha lasoo lifaaqay sidaan soo socota:

1. Ku qor magacyada meelaha, adeeg bixiyayaasha, iyo xarumaha ay dhici karto in aynu ku codsano macluumaadka foomka oggolaanshaha. Ku dar macluumaadka xiriirka dhammaan inta lagu qoray foomka oggolaanshaha.
2. Sixiix kadibna taariikh u samee foomka(foomamka) oggolaanshaha lasoo lifaaqay, kadibna
3. Kusoo celi foomka(foomamka) dhinaca Maamulka Naafooyinka Koriinka.

#### Maxaa dhacaya haddii aanan ka jawaabin codsigaan?

Fadlan uga jawaab sida ugu dhakhsiyaha baddan ee suurtoogalka ah, laakiin waa in aysan noqonin muddo kadambaysa 90 maalmood kahor inta aadan gaarin dhallashada da'daada labaatanaad (20<sup>aad</sup>). Haddii aynaan war kaa maqlin marka ay tahay \_\_\_\_\_, waxaan muraajaco ku samayn doonaa u qalmidaada anaga oo isticmaalayna macluumaadka aynu hayno ee ku jira faylkaaga macaamiilka. Haddii aan jirin macluumaad nagu filan oo lagu xaqiijinayo go'aanka u qalmidaada, markaasi u qalmidaada loogu talagalay Maamulka Naafooyinka Koriinka waa la joojin doonaa marka aad gaartid dhallashada da'daada 20<sup>aad</sup>.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah laxiriir:

MAGACA

LAMBARKA TELEEFONKA

CINWAANKA II-MAYLKA AMA BOOSTADA

Nuqulka sharciyada gobolka ee xukminaya u-qalmidaanka (WAC 388-823) waxaa la heli karaa marka la codsado ama waxaa laga heli karaa online-ka

<https://www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility>.

Lifaaqyada: Jadwalka Dokumeentiyada Loo Baahan Yahay  
Foomka oggolaanshaha (DSHS 14-012)

cc: Faylka macmiilka

**Jadwalka Dukumeentiga Loobaahanyahay**

<b>XAALADA NAAFADA</b>	<b>OGAANSHAHA CUDURKA</b>	<b>DHAKHTARKA OGGAADAY NOOCA CUDURKA</b>	<b>DIWAANO KALE</b>
Naafonimo Maskaxeed	Naafonimo Maskaxeed	Cilmi-nafsi yaqaan Rukhsadaysan, Cilmi-nafsi-yaqaanka Dugsiga ee Haysta Shahaado Washington ama cilmi-nafsi-yaqaan dugsi kale oo uu shahaado siiyay Ururka Qaranka ee Cilmi-nafsi-yaqaanada Dugsiga	Warbixin Nafsiyeed dhammeystiran ay ku jirto darajada Qiyaasta Caqliga (IQ) oo dhammeystiran ee ah in ka baddan labbo ka weecsanaan ee heerkii la rabey oo ka hooseeya cel-celiska, iyo darajada imtixaanka xirfadaha la qabsashada ee ka baddan labbo ka weecsanaan oo ka hooseysa cel-celiska.
Maskax Suux	Maskax Suux Curyaamista lugaha iyo gacamaha oo dhan Curyaanimada dhinac ka mid ah jirka Curyaanimada qaybaha jirka ee iska soo horjeeda	Dhakhtar Rukhsadaysan	Bilowga ka hor da'da 3 jir, iyo macluumaadka taageeraya baahida loo qabo gargaar jireed toos ah ee maalin kasta ee labbo meelood ama in ka baddan ah (musqul galidda, qubaysashada, cunidda, dhar xirashada, dhaq-dhaqaaqa, ama wargaarsiinta).
Qalal	Qalal ama Xanuun suuxdin	Dhakhtarka Dareemeyaasha ee uu Guddi Shahaado Siiyay	Oggaanshaha nooca cudurka oo ku saleysan taariikhda caafimaad iyo baaritaanka dareemeyaasha, xaqiijin laga helay dhakhtar ama dhakhtarka dareemeyaasha ee suuxdin aan la xakameyn oo sii-socota ama soo noq-noqota, iyo imtixaanka xirfadaha la qabsashada ee muujinaya xaddad xoog leh ee shaqaynta la qabsashada ee in ka baddan labbo ka weecsanaan heerka caadiga ah ee ka hooseeya cel-celiska.
Maskax Dhimanaan (iyada oo la eegayo DSM-IV)	Maskax Dhimanaan (Autism) ama Xanuunka Maskax Yara Dhimanaan Iyada oo la eegayo 299.00 ee DSM-IV-TR	Dhakhtar Cilmi-nafsi oo Shatiyaysan, Kalkaalisada Heerka Sare ee Diiwaangashan (ARNP) ee la xiriirta Xaaladda Maskax Dhimanaan (Autism) ama xarunta koritaanka ama Guddi Shahaado Siiyay: Dhakhtarka Dareemeyaasha, Dhakhtarka Dhimirka, ama Dhakhtarka Carruurta ee Dabeecadda iyo Koritaanka	Qiimeyn dhammeystiran iyada oo la eegayo DSM-IV buuxinaya dhammaan shuruuda oggaanshaha nooca cudurka, caddaynta dib-u dhaca ama shaqaynta aan caadiga ahayn ee ka hor da'da 3 ee bulshada, luuqadda, xirfadaha xiriirka ama ciyaarta summadeed ama hindiseed, iyo imtixaanka xirfadaha la qabsashada ee muujinaya xaddad muhiim ah oo ku saabsan shaqaynta la qabsashada ka baddan labo ka weecsanaan ee heerka caadiga ah ee ka hooseeya cel-celiska.
Kulmiyaha Xanuunka Maskax dhimanaan (iyada oo la eegayo DSM-V)	Kulmiyaha Xanuunka Maskax dhimanaan 299.00 Iyada oo la eegayo DSM-5 oo ay ka mid yihiin heerarka damnaanshaha 2 ama 3 ee labbada saf ee gudban	Dhakhtar Cilmi-nafsi oo Shatiyaysan, Kalkaalisada Heerka Sare ee Diiwaangashan (ARNP) ee la xiriirta Xaaladda Maskax Dhimanaan (Autism) ama xarunta koritaanka ama Guddi Shahaado Siiyay: Dhakhtarka Dareemeyaasha, Dhakhtarka Dhimirka, ama Dhakhtarka Carruurta ee Dabeecadda iyo Koritaanka	Qiimeyn dhammeystiran iyada oo la eegayo DSM-V buuxinaya dhammaan shuruuda oggaanshaha nooca cudurka, caddaynta dib-u dhaca ama shaqaynta aan caadiga ahayn ee ka hor da'da 3 ee bulshada, luuqadda, xirfadaha wargaarsiinta ama ciyaarta summadeed ama hindiseed, imtixaanka xirfadaha la qabsashada ee muujinaya xaddadka shaqaynta la qabsashada ee ka badan labo ka weecsanaan ee heerka caadiga ah, iyo FSIQ ee ah hal ka weecsanaan ee heerka caadiga ah ama in ka baddan oo ka hooseeya cel-celiska – ama – ka soo baxa dhammaan shuruudaha loogu talagalay Xanuunka Maskax Yara Dhimanaan (Autistic) 299.00 iyada oo la eegayo DSM-IV.
Dareemeyaal kale ama Xaalad Kale oo la mid ah Naafonimada Aqliga	Xanuun hiddo wadayaalka ama Neerfaha ah oo lagu yaqaano in uu sababo hoos u dhicid iyo daciifnimo xirfadaha laqabsashada iyo caqliga ah	Dhakhtar Rukhsadaysan	Darajada Qiyaasta Caqliga (IQ) ee dhammeystiran ee ka baddan ka weecsanaan heerka caadiga ee ah 1.5 oo ka hooseysa cel-celiska, iyo imtixaanka xirfadaha la qabsashada ee muujinaya xaddad xoog leh ee shaqaynta la qabsashada ee ah in ka baddan labbo ka weecsanaan heerka caadiga ah oo ka hooseeya cel-celiska.

**Fiiro gaar: Foomkan waa kaliya hagge guud Maamulka Naafuoyinka Koritaankana wuxuu u baahan karaa macluumaad dheeraad ah ama qiimeynyo. Dukumeentigan waa tallaabada koowaad ee go'aaminta u-qalmiitaanka. U qalmiitaanka Maamulka Naafuoyinka Koriinka waxaa lagu xadidayaa Cutub kasta oo 388-823 WAC ah.**